# Kolka Ilmahaaga Iskuul Laga Soo Cayriyo: Iskuulka Eryida

When Your Child Gets Kicked Out of School: School Expulsions

## Eryidda iyo Sharciga

Sharciga Minnesota wuxuu siiyaa ardayda xaquuq muhiim ah kolka laga eryayo dugsiyada dowlada. Dugsi kasta oo dowladeed waxa uu leeyahay xeer edbin oo ah mid "u janjeera dhanka ka hortagga." Si kale hadii loo yiraa, xeerku waa inuu xooga saaraa helida dhibaatooyinka iyo isku dayga wax ka qabadkooda ka hor inta aan edbintu dhicin. Iskuuladu waa inay raacaan sharciyada gobolka edbinta ee la yiraa Sharciga Eryida (Pupil Fair Dismissal Act).

**Haddii aad haysato ilmo naafo ah ama hela adeegyada waxbarashada gaarka ah, waxaa jira xeerar badan oo kale oo ay tahay iskuulku in uu u hogaansamo. Wixii akhbaar ah ka wac Rugta Sharciyada Naafada ee Minnesota (Minnesota Disability Law Center) ee (612) 332-1441 ama 1(800) 292-4150.**

## Goorma ayaa ardayga la edbin karaa?

Ardayga waxaa loo edbin karaa mid kasta oo ka mid ah sababahan soo socda:

- **Jabinta xeerarka iskuulka**
  Gudoomada iskuulada ayaa dejiya xeerarka ay kasabka tahay in ardaygu raaco. Xeerarku waa khasab inay cad yihiin, iskuulkuna waa khasab inuu cadeeyo in ardaygu uu xeerarka ogaa. Badanaa, xeerarku waxa ay ku qoran yihiin buuga gacanta ee ardayga/waalidka.

- **Si weyn u carqaladaynta xaquuqda ay dadka kale u leeyihiin waxbarasho**
  Ardayda looma ogola inay carqaladeeyaan fasalada, barnaamijyada iskuulka ka dib ah, ciyaaraha, iyo xafladaha iskuulka. Ardaygii carqaladeya iskuulka ama dhacdooyin iskuulka waa la edbin karaa.



- **Khatar ku ahaanta naftaada ama cid kale ama hanti iskuulka**
  Ardayda looma ogola inay sameeyaan waxyaabo khatar gelin kara iyaga naftooda, ama cid kale ama waxyeeli kara hanti. Tusaalayaal waxaa ku jira dagaalka, garaaca, tuurid ama jabin shay'aal ama ku hanjabid inaad cid kale ama naftaada waxyeelayso.

**Ogow:** Falka keena edbintu waa khasab inuu ahaa mid kas iyo ku talagal ah si ardayda loo edbiyo. Kas macnaheedu waa ula-kac.

Runtii waa ay adag tahay in laga mudaco iskuul ka fariisinada ama saaritaanda. Kolkaa, waa ra'yi wacan in lagala hadlo iskuulka qaabab iskuul fariisinada ama edbino kale la isaga dhowri karo mustaqbalka. Tan waxay noqon kartaa, sida waxyaabaha, caawimaad badan uu uu helo ardaygu, waalidka oo ay si fiican isaga war qabaan, ama qaabab ka duwan kuwii hore oo loo qaabilayo habdhaqanka. Hadii aad is leedahay edbintu waxa ay xadgudub ku tahay xeerka iskuulka, waa aad ka ashtakoon kartaa. Gudoon walba oo waxbarashadu waxa uu leeyahay nidaam u gaar ah oo arrintan qaabilsan. Ka eeg iskuulkaaga shabakadiisa (website) wixii akhbaar kale ah.

## Waa maxay eryidu?

Waa nooc ka mid ah ebdinta oo iskuul uu u isticmaali karo ardayga jabiya xeerarka. Ardaygii la eryaa ma dhigan karo iskuulkiisa ama iskuul kale ee uu gudoonku leeyahay ilaa iyo 12 bilood. Badanaa, ardayda waxa loo eryaa uun geysiga falalka aadka u xunxun ama falalka soo noqnoqda. Sababaha ugu badan ee ardayda looga eryo iskuulka Minnesota waa:

1. hub la imaadka iskuulka
2. haysashada maan-dooriyeyaal sharci-darro ah iyo
3. dagaalanka (gacanqaad)

Buuga gacanta ee waalidka/ardayga waxa dhici karta inay ku qoran tahay waxa uu yahay nooca edbinta ah ee loo isticmaalo xeerarka kala duwan ee la jabiyo. Buuga gacanta si taxadar leh u akhri. Ardaygaagu ma aha in iskuulka laga eryo hadii xeerka uu jabiyey uusan qorayn in mid ka mid ah caqaabahu uu yahay eryid.

## Waa maxay xaquuqda ardaygu kolka iskuulku uu doonayo eryid?

Ardaydu waxa ay leeyihiin xaquuq badan kolka ay qaabilayaan eryid. Eryidu waxaa dhici karta inaysan sharci ahayn hadii iskuulku uusan hubin in ardayga la siiyey xaquuqdaa:

- ***Ogaysiis**:* Ka hor inta uusan iskuulku arday eryin, iskuuku waa khasab inuu ardayga, waalidkii ama mas'uulkiisa uu siiyo ogaysiis qoraal ah oo ku saabsan qorshaha iskuulku uu ku eryayo. Ogaysiisku waa inuu lahaadaa:
  - xaqaa'iqa waxa dhacay
  - liiska makhraatiyaasha uu iskuulku qorshaynayo inuu hor keeno dhagaysiga dacwada eryida.
  - waxa ay makhraatiyaashu oran doonaan xilliga dhagaysiga dacwada
  - waqtiga, maalinta, iyo goobta dacwada
  - waxa ay yihiin xaquuqda ardayga iyo/ama waalidku kolka dacwada
  - tilmaam ah waxa iskuulku sameeyey si uu isugu dayo inuu ka hor taggo eryida
  - sida lagu helo liiska qareemo lacag la'aan ama qiimo jaban ku shaqeeya
  - nuqul ah Sharciga Eryida (Pupil Fair Dismissal Act) in lagu lifaaqo ogaysiiska



hadii mid kuwaa ka mid ahi aysan ku jirin ogaysiiska, waalidku waa in ay codsadaan iyaga.

- ***Xaqqa dacwo dhagaysiga**:* Arday iskuulka lagama eryo karo la'aanta dacwo dhagaysi, aan ka ahayn in ardayga iyo waalidku ay saxiixaan foom ay uga tanaasulayaan (fara ka qaadid) dacwada. Iskuulku waxa uu aad isugu dayi karaa inaad u saxiixdo tanaasulka caynkan oo kale ah. Laakiin xasuusnow – dhagaysiga dacwadu waa fursad uu ardaygu ku soo bandhigi karo dhinaciisa sheekada uuna ku hubin karo in iskuulku uu raacay xeerarka ay tahay inuu raaco. ***Mar walba la tasho qareen inta aadan saxiixin waxba.***

- ***Xaqqa ah inaad hesho wakiil sharci:*** Waxa aad xaq u leedahay in ciddi wakiil ka noqoto adiga iyo ilmahaaga xiliga dhagaysiga dacwada. Iskuulku waxa uu haysan doonaa qareen xiliga dhagaysiga dacwada adiguna waa inaad mid haysato. *Iskuulku waa inuu u sheegaa waalidka inay u heli karaan caawimaad lacag la'aan ah ama jaban dacwooyinkaa dhagaysigooda. U waco qareen sida si ugu dhaqsaha badan.*

- ***U diyaargarowga Dacwo Dhagaysiga:*** Waxa aad xaq u leedahay inaad:
  - Eegto diiwaanadda iskuulka ee ilmahaaga waxa ku jira ka hor dhagaysiga dacwadda
  - soo bandhigto daliil iyo makhraatiyaal kolka dacwadda la dhagaysanayo, iyo
  - inaad su'aalo imtixaan ah aad waydiiso makhraatiyaasha iskuulka


- ***Xaquuqda ah in dacwada degdeg loo dhagayso:*** Dacwada waa inay dhacdaa 10-cisho gudahood kolka uu iskuulku soo diro ogaysiiska eryida. Hadii adiga ama iskuulku aad haysataan sabab fiican oo aad ugu baahan tihiin waqti in la idin siiyo, mudadda waxaa la kordhin karaa ilaa iyo 5-cisho.



**Ardayda naafada ahi waxa ay leeyihiin xaquuq dheeraad ah hadii eryidi dhacayso ama lagu taliyey. Wixii akhbaar ah ka wac Rugta Sharciyada Naafada ee Minnesota (Minnesota Disability Law Center) ee (612) 332-1441 ama 1(800) 292-4150.**

## Maxaa dhaca dacwada dhagaysigeeda ka dib?

Dacwada dhagaysigeedu badanaa waxaa qaada mas'uul dacwo dhagaysi, kaa oo ah sidii xaakim oo kale. Mas'uulka dacwo dhagaysigu waxa uu u soo jeediyaa talooyin gudoonka waxbarashada kaa oo loogu "geeyo" gudoonka waxbarashada iyo waalidka 2-cisho gudahood laga bilaabi maalinta dacwo dhagaysiga. Gudoonka waxbarashada ayaa gaara go'aanka kama dambaysta ah ee ah in la eryo ardayga iyo in kale. Go'aankaa waa in lagu gaaraa kulan la qabto 5-cisho gudahood ka dib kolka gudoonka waxbarashada uu helo talooyinka la soo jeediyey.



Soo ogow kolka uu gudoonka waxbarashadu kulmayo. Hadii mas'uulka dacwo dhagaysigu uu ku talo eryid, ardayga iyo waalidku waa ay tagi karaan kulanka waydiisana karaan gudoonka waxbarashada inuusan ardayga eryin ama uu gaabiyo mudadda eryida. Gudoonka waxbarashadu waa khasab inuu ka dhigo qoraah ahaan go'aankiisa kama dambaysta ah uuna bixiyo sababo bayaan ah oo ku go'aan gaaridiisa.

Hadii aadan ku raacsanayn go'aanka gudoonka waxbarashada, waxa aad qaadan kartaa racfaan. Go'aanka waa inay ku jiraan akhbaar ku saabsan sida racfaanka lo qaato.

## Maxaa dhici hadii ardaygayga la soo eryo?

- ***Mudadda Eryida:*** Eryida macnaheedu waa ardayga looma ogola inuu iskuulka dhigto ilaa iyo 12 bilood. Gudoonka waxbarashadu waxa uu ardayda eryi karaa muddo ka yar 12 bilood, laakiin, waa sharci-darro in arday la eryo muddo ka badan 12 bilood. Hadii qori ama wax hub ah iskuulka lala yimid, iskuulku waxa uu ardayga eryi kara Ilaa iyo 12 bilood.

- ***Tacliin Cayn kale ah:*** Iskuulku waa khasab inuu waxbaro ardayda la eryo. Ardayda la eryaa waxa ay xaq u leeyihiin inay helaan "adeegyo waxbarasho oo cayn kale ah." Taasi waxay noqon kartaa waxyaabaha sida isqorida Rug Waxbarasho oo Cayn kale ah (ALC) ama guri wax ku barasho uu macallin kormeero. Adeegyadu waa khasab in loogu talagalay inay hubiyaan in ardaygu uu sii wado inuu horukac sameeyo ku aadan qalin jabinta uuna u diyaariyo ardayga inuu ku soo noqdo iskuulka ka dib kolka mudadda eryidu dhamaato.



- ***Iska Qorida Gudoono kale:*** hadii arday la eryo, markiiba lagama joojinayo inay iskuul ka dhigtaan gudoon waxbarasho oo kale. gudoonka waxbarashada ee ardayga eryey kama eryi kale gudoonada kale. Gudoonka waxbarasho ee ka duwan kan ardayga eryey kaliya waxa uu u diidi karaa ardaygu inuu isqaro hanaan la yiraa ka reebid. Ka reebidu waxa ay u baahan tahay ogaysiis iyo dacwo dhagaysi si la mid ah sida shuruudaha eryidu uga hadashay kor ee warqadan xogta aruursan.

## Ma jiraan waxyaabo kale oo uu yeeli karo ardayga qaabilaya eryidu?

Iskuulku waxa uu ku baaqi karaa waanwaan ama wax kale oo bedela eryida. Tusaale ahaan, iskuulku waxaa dhici karta inuu ku waydiisto inaad ogolaato inaad ilmahaaga kala baxdo iskuulka. . Arrintan waxaa la yiraa 'heshiiska la bixida ardayga." Marmarka qaarkood waxaa loogu yeeraa "heshiiska gala meeshii eryidda" ama ka 'saamixida dacwo dhagaysiga." Ama waxaa dhici karta inay kaa codsadaan inaad ku raacdo bedelida taa oo macnaheedu yahay ilmahaaga waa laga saari hal iskuul oo gudoonku leeyahay waxaana loo wareejin mid kale oo isla gudoonku leeyahay.

**Qaar ka mid faa'iidooyinka** waanwaanta waxaa ku jiri kara:

- skuulku waxa uu ogolaanayaa inuu ka tirtiro wax walba oo la xiriira eryada la soo jeediyey diiwaanka ardayga.
- Iskuulku waxa uu ogolaanayaa inuu bixiyo wuxuun adeego waxbarasho ah.
- Waxa ay ugu dhaqaaqi karaan qorshaha waxbarida si ka dhaqso badan tan aadida dhagaysiga dacwada eryida.

**Qaar ka mid ah khataraha** waanwaan gaaridu waa:

- Waxa aad faraha ka qaadi xaquuqdaada ah inaad dacwo dhagaysi hesho ayna suurtowdo inaad faraha ka qaado iyada mudicid adigoo sharciga cuskanaya ah.
- Waxaa laga yaabi karaa inay xadido waxa adeegyada tacliinta ah ee uu ilmahaagu heli karo.
- Waxaa dhici karta inaad dhib ka mudato inaad u hesho iskuul ardayga

*Waxaa wacan inaad la hadasho qareen ka hor inta aadan aqbalin baaq, aadna sida taxadar leh uga fakarto qodobada heshiiska.*

## Maxaan sameeyaa si uu iigu sii jiro ilmahaygu iskuulka?

Hadii ardaygaagu uu qaabilayo eryid, xasuusnow talooyinkan mar walba:


- Hore u *waydiiso caawimaad iskuulka.* Iskuulku waxaa dhici karta inuu fidiyo caawimaad iyo adeego kale oo badan. Waxyaabahaasi waxa ay ka hortaggi karaan dhibaato yimaada mustaqbalka waxa ayna joojin karaan in habdhaqanka xun ee ardayga uu ka sii daro.

- *La hadal qareen*. Ka hel Qareen shabakada ah [www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics](http://www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics) ama liiska qareenada lacag la'aanta ah ama qiimaha jaban ee ay khasabka tahay in iskuulku uu ku siiyo.

- *Nuqul kala har wax walba oo aad hesho.* Meel ku qoro hayna dhamaan wixii telefan kuwada hadal ah, ogaysiisyo ama boostada kuugu yimaada ee iskuulku ama gudoonka waxbarashadu leeyahay. Hubi wax walbaa in ay qoran tahay taariikhda, waqtiga iyo qofka aad la hadashay. Nuqulo (copies) ka samee wax walba oo aad iskuulka siiso.

- *Ogow xaquuqdaada*. Xaquuqda aad leedahay waxaa lagu xusay warqadan xog aruurinta waxa ayna ku salaysan tahay waxa la yiraa xaquuqdaada dastuuriga ah ee aad u leedahay dacwo dow marin leh inaad hesho. Waa muhiim inaad og tahay xaquuqahaa aadna ku adkaysato inay u hogaansamaan.

- *Hubi in ilmahaagu uu helo adeegyo waxbarasho oo nooc kale ah.* Ardayga inta badan marka hore iskuulka waa laga fariisiyaa ka dibna waa laga eryaa. Iskuulku waa inuu u bilaabaa siinta adeegyada waxbarashada ka dib maalinta 5aad ee ka fariisinta iskuulka. Hubi in tani dhacdo, aadna kala shaqeyso iskuulka si aad u hubiso inay wixii laga rabay sameynayaan si ay uga caawiyaan ardaygu inuu horukac tacliineed sameeyo.




***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**